



Xarunta xiriirka – adeegyo iyo talobixin degmo

Degmadu adeegyo badan oo noloshaada ka mid ah ayey bulshada u haysaa, sida dugsiyada, xannaanada waayeelka, jidadka, beeraha nasashada, fursadaha madaddaalada iyo dhaqanka. Helsingborgs stad waa magaca hay'adda ka hawlgasha degmada aad deggan tahay.

Waa inaad si fudud ku heshaa xiriirka degmada iyo xallinta arrimaha iyo hawlaha kaa soo gala halkaas. Taas darteed ayaa loo sameeyey xarunta xiriirka oo aad kaga maarmeyso inaad ku wareerto qeybaha kala duwan ee maamulka degmada. Xarunta xiriirka waxaad weydiin kareysaa dhammaan su'aalaha ku saabsan arrimaha degmada, annagana waxaan ku dadaaleynaa inaan kuu xallinno arrimahaaga sida ugu dhaqsaha badan ee aan awoodno. Waxaad sidoo kale talo iyo tusaale ka heli kareysaa la-taliyeyaasheena takhasuska gaarka ah leh. Adeegyadeenu waa bilaash.

Waxaad xarunta xiriirka ku haleeli kartaa siyaalo badan iyo xilliyo shaqo oo kala duwan. Tusaale ahaan sabsiyada weynu furan nahay. Luuqaddeena adeegga waa Iswiidhish hase yeeshee dhammaan dadka halkaan ka shaqeeya wey garanayaan af-ingriiska, waxaa xitaa jira shaqaale naga mid ah oo ku hadla luuqado kale.

Talooyinka laga heli karo xarunta xiriirka

Arrimaha miisaaniyadda iyo amaahda

Ma waxaa kugu adkaatay inaad lacgta aad qaadata isku kaafiso? La-taliyeyaasha arrimaha miisaaniyadda iyo amaahyada waxaa talo ka heli kara adigagaaga ku jira xaalad adag oo dhaqaale ama adigaaga u baahan in lagula dhiso miisaaniyadda noloshaada.

Arrimaha tamarta iyo cimilada

La-taliyeyaasha arrimaha tamarta iyo cimilada waxay kaa caawimaayaan tabo u wanaagsan cimilada oo aad ku yareyn lahayd kharashka kaaga baxa korontada iyo diirinta hooyga. Waxeyna caawiyaan shakhsiyaadka iyo shirkadleyda, labadaba.

Arrimaha macaamiisha

Yaan lagu sirin markaad wax iibsaneysa! La-taliyeyaasheenna arrimaha macaamiisha waxeey khabiirro ku yihiin xuquuqda macaamiisha (shuruucda iibka) oo waxey talo siiyaan shakhsiyaadka iyo shirkadleyda, labadaba.

Warbixin ku saabsan EU

Ma jiraan wax aad dooneyso inaad ka ogaato EU? Go'aannada ka soo baxa degmada waxey inta badan ku saleysan yihiin go'aamada Midowga Yurub. Khabiirkeenna

arrimaha EU wuxuu ka jawaabayaa su'aalaha ku saabsan EU, wuxuuna qabqaabinayaa muxaadaroyin, doodo iyo seminaaro.

Xarunta iskaa-wax-u-qabso

Ma rabtaa inaad shaqo tabaruc ah xilliga aad firaaqada leedahay u qabato qof kale? Markaas xarunta iskaa-wax-u-qabso waa wax adiga laguugu talogalay. Laga yaabee inaad dooneyso inaad la saaxiibto qof aan kugu hidde iyo dhaqan ahayn?

Wakiilka arrimaha waayeellada

Adigaagii da'daada ay tahay 65 jir iyo wixii ka weyn. Talo, taageero iyo tusaale xaaladaha saameynaya noloshaada oo dhan. Xitaa xigtada waayeelka ayaa nala soo xiriiri karta.

Wakiilka arrimaha dadka naafada ah

Adigaagii naafada ah, mid muuqata ama mid aan muuqanba. Talo, taageero iyo tusaale xaaladaha saameynaya noloshaada oo dhan. Xitaa xigtada ayaa nala soo xiriiri karta.

Xilliyada shaqada xarunta xiriirka

Isniin-khamiis: 07:00-19:00

Jimce: 07:00-17:00

Sabti: 10:00-15:00

Siyaalaha aad xarunta xiriirka ku haleeli karto

Telefon: 042-10 50 00

Meyl: kontaktcenter@helsingborg.se

Booqasho: Stortorget 17

Boosto: Helsingborg kontaktcenter, 251 89 Helsingborg

Chatt: loo maro helsingborg.se

Facebook: facebook.com/helsingborgsstad

Warbixin dheeraad ah: www.helsingborg.se/kontaktcenter